# Furiinka qoyska carruurta leh

## Ero lapsiperheessä

Euroopan unionin osarahoittama

# Cunug/carruurta iyo furiinka

Carruurtu waxay leeyihiin xuquuqo gaar ah. Waxaana heshiiska lagu qoray xuquuqda ilmaha ee qaramada midoobey. Finland waxay u hoggaansantaa heshiiskan.

Qayb muhiim ah oo ka mid ah axdiga xuquuqda Ilmaha ayaa ah qaanuunka sheegaya in danta carruurtu ay muhiim tahay. Dadka waaweyni waa in ay marka hore ka fekeraan waxa ilmaha u fiican marka ay go'aan gaarayaan.

**Sharciga daryeelka carruurta iyo xuquuqda la kulanka** ayaa  sheegaya xuquuqda ilmaha furriinka ka dib.  Sida sharcigu qabo

- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay labada waalidba.
- Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu ra'yigiisa dhiibto.
- Ra'yiga ilmaha waa in la dhageysto, laakiin waalidka ayaa go'aanka leh.

Sharciga waxa kale oo uu sheegayaa waxa ay tahay in waalidiinta ay sameeyaan.
(https://www.finlex.fi/fi/lainsaadanto/1983/361)

Euroopan unionin osarahoittama

Niitty2

Tampereen ammattikorkeakoulu

TAMPERE

Pirkanmaan hyvinvointialue

# Cunug/carruurta iyo furiinka

*Marka ay waalidku kala tagaan, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu xiriir dhow oo ammaan ah la lahaado labada waalidba.*

Mas'uulku waa qofka

- ilmaha xanaaneeya
- go'aana ka gaara arrimaha ilmaha

Marka waalidku ay si wadajir ah ilmaha mas'uul uga yihiin, waxay si wadajir ah go'aan uga gaaraan arrimo badan.

Afduubka caruurta waxaa loola jeedaa

- in cunug ka yar 16 sano oo deggan Finland loo kaxeeyo dibadda iyadoon la heysan ogolaanshaha qofka ilmaha masuulka ka ah
- cunuga dibadda loo kaxeeyey oo aan Finland dib loogu soo celin waqtigii lagu heshiiyey.

Afduubka carruurtu Finland waa dambi.

# Furiinka qoyska carruurta leh

Si wadajir ah uga wada hadla mas'uuliyadda iyo halka uu ilmuhu ku noolaanayo.

- Ma labada waalid baa leh mas'uuliyadda ilmaha?
- Cunugu ama ilmuhu yeey la nool yihiin?

**Dandhowraha carruurta:** Waqti ka qabsada dandhowraha carruurta. Halkaas ayaa go'aan wadajir ah lagu gaaraa:

- Halka ay carruurtu deganaanayaan.
- Xilliyada ay la joogayaan waalidka kale.
- Lacagta uu waalidka kale siiyo ilmaha (masruufka ilmaha).

## Go'aan rasmi ah oo ka soo baxa maxkamadda degmada

**Haddii aad u baahatid caawimaad qareen:**

- Adigu waad iska bixin kartaa kharashka qareenka.

AMA

- Waxaad dawladda ka codsan kartaa kaalmo sharci oo lacag la'aan ah. Waxaad heleysaa caawimaad sharci haddii dakhligu ama lacagtu kugu yar tahay

## Hadii aad heshiin weydaan

**Dhexdhexaadinta Arrimaha Qoyska**

- Xirfadlayaal ayaa gacan ka geysta ka heshiinta arrimaha.

**AMA**

Heshiisiinta Follo (Dhexdhexaadin maxkamadeed oo khabiir lug ku leeyahay)

**AMA**

Haddii ay waalidku ku heshiin waayaan arrimaha ilmaha, waxay waydiisan karaan in ay maxkamadda degmadu go'aan arrinta ka gaarto .

# Caawinta xilliga furiinka iyo ka dib

**Waxtarka waalidnimada is barbar socda**
Barbaarinta iyo talo siinta qoyska.
Lacag la'aan

**Talooyin, Caawinaad**

- Dandhowre (lacag la'aan)
- **la talinta arrimaha bulshada iyo la talinta qoysaska carruurta leh (lacag la'aan)**
- https://www.suomi.fi/oppaat/ero

Waxay bixiyaan caawimaad wada hadal oo lacag la'aan ah

- Ururada xubnaha ka ah
- Wadahadalka loogu talagalay caawinta furriinka
- MIELI ry: Khadka caawinta xaaladaha dhibaatada ah
- (09 2525 0111)
- kaniisadaha

Ururo iyo hay'ado badan ayaa bixiya taageero lacag la'aan ah.

Halkan ka fiirso fiidiyowyada ku saabsan furiinka:
https://helsinki.mll.fi/ero-lapsiperheessa/
Luqadaha: Finnish - Iswidish - Ingiriis
Carabi - Soomaali - Ruush

Euroopan unionin osarahoittama
Niitty2
Tampereen ammattikorkeakoulu
TAMPERE
Pirkanmaan hyvinvointialue

Euroopan unionin osarahoittama

Niitty 2 -hanke 2023-2026

Yhdessä maahanmuuttajaperheiden hyvän arjen puolesta

Lisätietoa hankkeesta:
https://projects.tuni.fi/niitty2/

Perheinfo-aineistoportaali:
tuni.fi/perheinfo

Niitty2

Tampereen ammattikorkeakoulu

Pirkanmaan hyvinvointialue

TAMPERE